



LIISKA HUBINTA DEGDEGGA



TAKE WINTER BY STORM

Isu diyaari in aad daryeesho naftaada iyo kuwa jooga agagaarkaada ugu yaraan saddax maalmood.

Samee agabka degdegga qoyska iyo rabbaayadda oo kugu filan ugu yaraan saddex maalmood waxyaabaha lagama maarmaanka ah (toddo ilaa toban maalmood ayaa la doorbidaa). Agabku waa in la qaadan karaa, waana in uu diyaar yahay in la qaato marka lala kulmo xaaladaha daad-guraynta.

- Biyaha: hal galaan oo biyo ah qofkiiba, maalintiiba, ugu yaraan saddex maalmood (loogu talagalay cabitaanka iyo nadaafadda)
- Raashinka aan halaabin – ugu yaraan saddax maalin, raashin aan halaabin, diyaar u ah in la cuno, iyo qalabka lagu furo qasaca ee gacanta ku shaqeeyo
- Raadiyow ku shaqeeyo baytari ama midka gacanta lagu wareejiyo iyo Raadiyaha Cimilada NOAA ee laga maqlo digniinta codka iyo baataeri dheeraad ah labadoodaba
- Toosh iyo batteriyo dheeraad ah
- Qalabka gargaarka degdegga
- Kaadhka Xidhiidhka Degdegga
- Qalab loo isticmaali karo siyaabo badan
- Siidhi lagu dalbado kaalmo
- Xarqadaha lagu dilo jeermiska, jawaanada qashinka lagu uruuriyo iyo xadhkaha blastiigga ee ee loogu talagalay nadaafadda qofka
- Maaskarada boodhka, si ay u caawiso reebidda hawada wasakhaysan
- Telefan – gacmeed iyo buuxiyeyaal (waxaa lagu taliyaa buuxiyaha baabuurka marka quwadda baxdo)
- Bustayaasha diiran xaaladaha degdegga
- Koodhadhka roobka laga xidho ee la siiyo xubin kasta oo ka tirsan qoyska
- Saadka nadaafadda qofka (caddayga, kiriimka caddayga, tirtirka nadaafadda, saabuun, tuwaal...)
- Nuqulada warqadaha muhiimka ah, oo la dhex geliyo weel/bacda biyaha celisa
- Nuqulka liisankaaga wadista baabuurka iyo/ama shahaadada dhalashada
- Macluumaadka xisaabta bangiga
- Kaadhada Caymiska/lambaradacaymiska/macluumaadka xidhiidhka caymis galiyaha
- Lacagta caddaanka (mishiinada bangiga waxa dhici karta inayna shaqayn, waxaa ugu fiican warqadaha lacagta yaryar)
- Fureyaal dheeraad ah oo lagu furo guriga
- Dawooyinka dhaqtarka qoro (waxaa la soo jeedinaa saad ku filan toddobo maalmood)
- Saadka Rabbaayadda (cuntada, biyaha, bustaha, daawooyinka)
- Saadka carruurta/cunnuga (buugga midabeynta/krayon, xaafaayado/tirtireyaal, qaacido, raashinka cunnuga)


* Mar kasta hubi taariikhaha dhicista, kaddibna casriyey agabkaaga isu-diyaarinta degdegga 6 bilood kasta. Isticmaal taariikhyada la keydsado iftiinka maalinta si ay kuu xusuusiyaan fiirinta aqabkaada.

Waxyaabaha kale ee loo baahan yahay in aad ku haysatid gurigaaga ama goobta shaqada ama dugsiga

- Kaadhka Xidhiidhka Degdegga
- Tilmaamaha iyo qalabka si aad u xidho gaaska, korontada iyo biyaha
- Blaastikada lagu dabool darbiyada ama sharootada lagu daboolo meelaha qabaqga ka soo galo hooyga
- Bustayaal diiran
- Tarbaal, taandhooyin iyo xadhig
- Dab damiye
- Qalabka lagu ogaado kaarboon mono-ogsaydh (carbon monoxide)
- Macluumaadka xidhiidhka danabka oo si dhibyar lo heli karo haddii ay soo dhacaan fiilooyinka quwadda, gaaska fakado ama biyaha soo fataho
- Xaaq si aad uga saarto caleemaha soo daadatay ama qashinka dareerinta biyahaarobkasi looga hortago fatahaadda waddooyinka
- Qalabka sifaynta biyaha
- Badiilka barafka iyo milixee si aad barafka soo dhacay iyo midka dhulka ku xargagay uga xaaqdo dhabaha si loo sugo ammaankaada iyo ammaanka dadka kale
- Waxyaabaha lagu daboolo qasabada dibadda iyo/ama waxyaabaha ka celiya qabawga ee lagu duuboqasabada dibadda si loo badbaadiyo qabawga biyaha u baddala baraf
- Kariyaha dibedda iyo shidaalka (loo isticmaalo dibedda oo keliya)
- Xaabada iyo kabriidyada biyuhu aanay soo gali karin (loogu talagalay meelaha dabka lagu shido ama isticmaalka dibadda oo kaliya)
- Saadka Caafimaadka (qalabka kaalmeeya maqalka iyo battariyo dheeraada, muraayado, muraayadaha indhaha la gashto (contact lenses) iyo milanka, cirbadaha, baakoorta)
- Raadhiyaha ku shaqeeyo labada dhinac iyo battariyo dheeraada
- Khariiradaha deegaanka ee leh khadadka daadgurayn ee horay loo ogaaday
- Baahida dheeraadka ah ee u gaarka ah qoyska
- Hagoogta roobka
- Qalabka isu diyaarinta argaarka degdegga
- Badiil yar iyo waxyaabaha lagu jiiido (ciida, qashinka, silsiladha) marka la saadaaliyocimiladu barafowdo iyo barafka soo dhaca
- Khariiradadaha ku kooban meel ama degmada oo tilmaamaya waddooyin hore loo qorsheeyay loogu talagalay daad-guraynta

Waxyaabaha gaarka ah ee loo baahan yahay in la geliyo baabuurkaada

- Kaadhka Xidhiidhka Gurmadka
- Hilaaca
- Dhar diiran iyo kabo adag oo lagu socdo
- Bustayaal diiran





LIISKA HUBINTA DEGDEGGA



Samee oo raac qorshaha maaraynta halista/ka difaaca cimilada gurigaaga ama hantidaada si aad u yareeysid waxyeelooyinka duufaana

Sannad kasta, dib-u eegis ku samee caymiska hantidaada si aad u fahanto, waxna uga qabato baahida caymiska. Waydii caymiska fatahaada ama caymiska bulaacadaha/dareerinta marka tubooyinka xermaan.

Dibadda

- Hubi saqaafka in uu ku jiro jilli aan meel haysanin, jilli maqan, jilli duug ah, ama burbur soo gaaray si aad uga hortagto qashinka duulduula una yarayso in burbur uu ka soo gaaro biyaha.
- Hubi in maadada biyo celinta ku sugan tahay agagaarka meelaha daloola iyoqaac bixisada saqaafka.
- Nadiifi masharaabta oo hubi in ay si haboon isugu toosan yihiin oo ay si adag ugu dhaggan yihiin gurigaaga.
- Fiiri qaabka sida biyaha duufaanka uga dareeraan taagyada u dhaw gurigaaga, oo ogow meelaha biyaha dareera ku kulmaan. Fiiri taagaga agagaarka gurigaaga haddii ay jiraan caalaamadaha tilmaama dhaqaaqa dhulka, sida carro guurka yar, qashinka duulduula ama geedaha qaloocan. La xidhiidh farsamada dhulka ama injineerka dhismaha si aad u ogaatid darnaanta dhibaataada.
- Kor u kici hantida sibiyo uga soo dareeraan aasaaskaiyo si masharaabta ay biyaha ka sii jeediyaan guriga kuna toosiyaan siistemka dareerinta biyaha duufaanka.
- Baddal waxyaabaha lagu cubo iyo waxyaabaha lagu dhajiyay ee ka hortagga cimilada balse ka soo fuqay meelaha lagu dhajiyay.

Aqalka gudhiisa

- Hubi qalabka lagu ogaado qiiqa iyo kaarboon mono-ogsaydhka (carbon monoxide) iyo badal battariyada marka loo baahdo. Baddal unugyada siddeedii sannadoodba.
- Hubi qolalka ka hooseeyo dhulka iyo hulalka hoose haddii ay leeyahiin qoyaan ama biyuhu dhaafaan. Biyaha fadhiya waxay calaamada u noqon karaan biyo aan si haboon u dareerin.

Samee qorshaha xidhiidhinta qoyska

- Kala hadal qoyskaaga iyo/ama saaxiibadaa sida loo diyaariyo oo looga jawaabo xaaladaha degdegaa ee inta badan la filaayo in ay ka dhacaan halka aad ku nooshahay, meesha aad wax ka barato, meesha aad ka shaqeyso iyo meesha aad ku ciyaarta. Tilmaan masuuliyada saaran xubin kasta oo ka tirsan reerkaada oo qorshee in aad koox ahaan u wada shaqeeyaan.
- Tilmaan xidhiidh ka baxsan deegaanka. Masiibada kaddib, waxaa in badan leysku haleyn karaa khadadka telefanka masaafada dheer marka loo fiiriyo khadadka deegaanka. Waydii saaxiib ama qaraabo ku nool meel ka baxsan gobolka Washington in ay noqdaan "xidhiidhka qoyska." Masiibada kaddib, la xidhiidhka qoyskaaga waxay noqonaysaa barta isgaarsiinta si macluumaadka loola wadaago dhammaan xubnaha qoyska. Qorshahaagu waxaa uu ku xidhan yahay qof kasta oo garanaya lambarka telefanka qofka lala xidhiidho.

Dhammaystir liis tafatiran oo ku saabsan alaabta taala guriga ee aad leedahay, waxaadna dhigtaa meel ammaan ah oo ka baxsan gurigaaga (sida khasnada lacagta lagu kaydsado oo). Waxaad foomka kala soo bax bogga internetka TakeWinterByStorm.org.

- Xaaq caleemaha kana fogey meelaha biyaha maraan si aad uga hortagto biyaha ku soo fataha wadooyinka iyo hantida.
- Hubi in aysan dabacsaneyn meelaha gacanta lagu qabsado jaranjarada, tiirarka jaranjarada iyo waxyaabaha lagu daboolo jaranjarada. Waa in la hagaajiyo meelaha lagu socdo ee qaloocmay ama dildilaacay
- Xaaq barafka soo dhaca iyo barafka fadhiya ee yaala meelaha lagu socdo gurigaaga hortisa si aad uga ilaaliso kufid khatar ah (tani waa masuuliyad saaran milkiilaha guriga/hantida).
- Ka ilaali in barafku uusan ku badanin meelaha dumi kara.
- Gaagaabi dhirta soo gaarta dhinaca guriga si looga hortago waxyeelada cayayaanka iyo qoyaanka. Jar dhirta soo gaarta meelaha lagu socdo.
- Adeegso waxyaabaha qabawga ka celiyo tubooyinka biyaha iyo qasabadaha dibadda si aad uga badbaadiso in biyaha ku jiro la fadhiistaan qabawga.

- Hubi dhammaan daaqadaha in ay si haboon u shaqaynayaan iyo in la xero karo.
- Tijaabi bambka biyaha dibadda u saara ka hor inta uusan bilaabanin xilliga qoyaanka. Bambooyinka biyaha dibadda u saara ee ku shaqeyso battariyo loona isticmaalo kayd ahaan, waxay ku badbaadin karaan marka ay baxdo quwadda ay ku shaqeyso banka asaasiga.

- Buuxi Qorshaha Isgaadhsiinta Qoyska kuna dhaji meelaha qoyskaagu ku qaado waqtiga badankiisa. Waxaad qorshayaasha kala soo baxdaa bogga internetka TakeWinterByStorm.org.
- Waxaad dhammaan lambarada xidhiidhka degdegaa gashataan dhamaan telefoonadiina, ama hayso liiska adigu. Hubi in aad qoyskaaga iyo saaxiibadaa u sheegto inaad iyaga ku dartay liiska xidhiidhka degdegga.
- Isticmaal fariirnta la qoro haddii carqalada soo gasho shabakada taasoo sababta in la dirsan waayo telefoonada. Ma shaqeyn doonaan tilfoonada aan ku shaqeynin fiilada (wireless) haddii korontadu go'do. Waxaa inta badan leysku haleyn karaa telefoonada ku shaqeyso fiilada (land line).
- Xogogaal ahaaw. Daar janalada warbaahinta deegaanka si aad u ogaato warbixinaha cusub iyo tilmaamaha. Booq bogga internetka TakeWinterByStorm.org si aad u ogatid meelaha lagala xariiro sida la isugu qoro siistemyada digniinta degdegga ee deegaanka.

* Bar qoyskaaga iyo asxaabtaada bogga internetka TakeWinterByStorm.org. Boggaan laga helo wararka iyo tababarka ee ku saleysan internetka waa in lagu daraa qorshooyinkaada xidhiidhka iyo isu diyaarinta degdegga.